Barnmorskemottagningar

Patientinformation: Fosterrörelser översatt till somaliska

Datum: 2025-05-27

# Dhaqdhaqaaqa uurjiifka

## Sidaan baa loo dareemaa dhaqdhaqaaqa uurjiifka

Dhammaan uurjiifku si iskood ah ayay uurka ugu dhaqdhaqaaqaan. Waqti ku dhow toddobaadka 18aad ilaa 20aad ee uurka waxaa caadi ah in la dareemo dhaqdhaqaaqa ilmaha markii ugu horeysay. Qaar waxay dareemaan dhaqdhaqaaqa goor hore, qaar kalena kadib.

Uurjiifku wuxuu u dhexeeyaa soo jeed iyo nasasho. Nasashada waxay caadi ahaan socotaa 20 ilaa 40 daqiiqo, marar dhif ah ayay ka badan tahay 90 daqiiqo. Waa caadi in la dareemo dhaqdhaqaaqa ugu badan xilliga fiidkii.

Uurjiifku wuxuu leeyahay dhaqdhaqaaqyo waaweyn iyo kuwo yaryar labadaba. Dhaqdhaqaaqyada ayaa laga yaabaa in loo dareemo sida ruxruxid ama xaaqid. Bilawga, waa caadi in la dareemo dhaqdhaqaaqyo yaryar ah. Marka uu uurjiifku sii weynaado, dhaqdhaqaaqyadu waxay sidoo kale noqon karaan kuwo muuqda, sida laadadka ama jugsiinta.

Way kala duwan yihiin inta uurjiifku dhaqdhaqaaqiisa uurka uu yahay. Qaarkood aad bay u fir-fircoon yihiin, qaar kalena way deggan yihiin, laakiin dhammaantood waa ay dhaqdhaqaaqayaan ilaa ay ka dhalanayaan.

Qiyaastii toddobaadka 24aad ee uurka, waxaad caadi ahaan u dareemi kartaa uurjiifka si cad oo waxaad garan kartaa marka uu soo jeedo.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

Toddobaad kasta oo dhaafa, uurjiifku wuu koraa, dhaqdhaqaaquna wuu sii xoogaysanayaa ilaa toddobaadka 32aad ee uurka. Markaa kadib dhaqdhaqaaqyadu qiyaas ahaan waa isku awood ilaa dhalidda.

Dhamaadka uurka, ilmo-galeenku waa ciriiri. Markaa dhaqdhaqaaqyadu waxaa loo dareemi karaa inay ka duwan yihiin sidii hore, laga yaabee inay yihiin sida cadaadis xoog leh ama sida in ilmuhu iskala bixinayo oo kale. Dadka qaarkood waxay dareemaan in dhaqdhaqaaqyadu ay ka aayar sanyihiin marka loo eego sidii hore, laakiin waa inaysan hoos u dhicin cadad ahaan iyo xoog ahaan.

# Calaamadaha muujinaya dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada

Dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada waxay ka dhigan tahay in uurjiifku noqday mid aad u shanqar la'. Markaa waxaa ogaaneysaa in uurjiifku lahayn waqtiyo uu soo jeedo oo cad.

Waxaad la kulmeysaa farqi cad sida uu uurjiifku u dhaqaaqo hadda marka loo eego sida uu horay u dhaqdhaqaaqi jiray. Waa inaad saas dareentay in ka badan laba saacadood.

# Goorma iyo halkee ayaan daryeel u raadsadaa marka dhaqdhaqaaqa uurjiifka uu yaraado?

Maalmaha shaqada ee maalintii ah, waxaad la xiriiri kartaa rugta umulisadaada ama ummulinta. Habeenkii iyo maalmaha fasaxa ah, waa inaad la xiriirtaa rugta ummulidda si aad u hesho macluumaad ku saabsan meesha aad aadi karto. Haddii aad qabto welwel weyn ka dib toddobaadka 24aad+0 ee uurka, waxaad si toos ah u aadi kartaa ummulisiinta.

**Ha sugin ilaa maalinta xigta!**

Had iyo jeer waa muhiim in la raadsado daryeel marka uu hoos u dhaca dhaqdhaqaaqa uurjiifka. Tani waxay sidoo kale khuseysaa haddii aad hore u raadsatay daryeel, baaritaannadana muujiyeen in uurjiifku u wanaagsan yahay. Mar labaad raadso daryeel haddii aad dareen cusub u yeelatay dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraaday.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo macluumaadka xiriirka ee rugta ummulidda, waxaad ka raadin kartaa 1177.

## Intee in le'eg ayaan u fiirsadaa dhaqdhaqaaqa uurjiifka?

Way kala duwan tahay inta dumarka uurka leh ay dareemaan dhaqdhaqaaqa ilmo-galeenka. Qaar baa fiiro gaar ah u leh laad kasta. Qaar kale aad ugama fikiraan sida uurjiifku ugu dhaqdhaqaaqo uurka dhexdiisa.

Looguma talogelin in adiga uurka leh aad dareento cadaadis ah in aad la socoto dhammaan dhaqdhaqaaqyada uurjiifka. Uma baahnid in aad waqti u yeelatid inta jeer ee uurjiifku seexdo ama kala goysid hurdadaada iyo in calooshaada ruxdo si aad u aragto in ilmuhu  hurdada ka kacaayo iyo in kale.

Adiga iyo uurjiifku waxaad leedihiin caadooyin iyo dhaqdhaqaaqyo oo mid kasta u gaar ah. Waa marka sida ay wax ku socdeen ka leexdaan oo kaliya marka ay tahay in fiiro gaar ah u yeelato.

## Maxaa keena dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada?

Dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada waxaa sabab u ah mandheerta oo aan u shaqayn sidii la rabay. Markaa waxaa jirta khatar ah in uurjiifku helo nafaqo aad u yar iyo ogsijiin. Hoos u dhaca shaqada mandheerta waxay kor u qaadeysaa khatarta, tusaale ahaan, sonkorowga, dhiig karka,

buurnaanta, sigaarka iyo haddii aad dhaaftay waqtigii qiyaasta dhalmadaada ugu yaraan hal toddobaad.

## Baaritaannada rugta ummulinta

Haddii aad ka shakisan tahay dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraaday, waa inaad marka hore la hadashaa umuliso, taasoo ku weydiin doonta dhaqdhaqaaqa uurjiifka. Waxaa laga yaabaa inay jiraan su'aalo ku saabsan sida dhaqdhaqaaqa isu beddelay iyo markaad dareentay.

Qaar ka mid ah kuwa la kulma dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada waxay u baahan yihiin in lagu baaro CTG iyo qalabka sare ee codka lagu dhageysto ee rugta ummulisiinta.

Inta badan dadka la kulma dhaqdhaqaaqa uurjiifka oo yaraada waxay dhalaan ilmo caafimaad qaba. Waxa dhici karta in ilmuhu u baahan yahay inuu soo baxo haddii baadhitaanadu muujiyaan in aanu ilmuhu fiicnayn.

## Ma rabtaa inaad wax badan sii ogaato?

Had iyo jeer waxaa kusoo dhowaataa inaad la xiriirto xafiiska umulisadaada haddii aad dareento inaad u baahantahay inaad wax badan ogaato.